

Heshiiska Oggolaanshaha U-Bannaanaan La'aanta

Loogu Talagalay Barnaamijyada Gargaarka Cuntada

Disqualification Consent Agreement

LAMBARKA	MAGACA MACMIILKA	SSN-KA MACAAMIIL	TAARIIKH DHALASHO MACMIIL	LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA
<p>Aniga oo ah, _____, waxaan fahamsanahay in: MAGAC HORE, MAGAC DHEXE, MAGAC DAMBE</p> <p>Haddii shaqsigaa eedayn uusan ahayn madaxa qoyska, madaxa qoyska waa in sidoo kale uu saxiixo Heshiiska Oggolaanshaha U-Bannaanaan La'aanta sida lagu sheegay 7 CFR 273.16(h)(I)(ii)(A)</p> <p>Aniga oo ah, _____, waxaan fahamsanahay in: MAGACA HORE EE MADAXA QOYSKA, MAGACA DHEXE, MAGACA DAMBE</p> <p>1. Dhammaan xubnaha kale ee waawayn ee ku jira qaybta caawimaada cuntadayda iyo aniga ayaa mas'uul ka ah dib u bixinta lacagta sheegashada midaasi ka dhalata, aan ka ahayn haddii qofka wayn ee xubinka ahi uu dib u bixiyo lacagta la sheegtay midaas oo ay sabab u tahay kasoo bixida shuruudaha heshiiska.</p> <p>2. Aniga la iguma helin dambi xog-leexin ama xatooyo madani ama denbiilennimo. Hase yeeshe, marka aan saxeexo heshiiskan, ma heli doono waxtarka gargaarka Cuntada ee abiga la isiin lahaa oo waxa laga yaabaa in unuggayga gargaarku heli doono qadar gargaar cunto oo intii hore ka yar marka aanan lahayn u-bannaanaan.</p> <p>3. Marka aan saxeexo Heshiiskan Oggolaanshaha U-bannaanaan La'aanta, waxa aan fahmay in aan waayi doono u-bannaanta muddo ah:</p> <p><input type="checkbox"/> 12 bilood <input type="checkbox"/> 24 bilood <input type="checkbox"/> Toban (10) sannadood <input type="checkbox"/> Joogto-ahaan</p> <p>Kani waa: <input type="checkbox"/> Ku xadgudubkeygii iguu horreeyay: <input type="checkbox"/> Ku xadgudubkeygii labaad; <input type="checkbox"/> Ku xadgudubkeygii saddexaad, AMA</p> <p><input type="checkbox"/> Anigu waxaan gargaarka cuntada laba gacmoodin uga qaatay meelo ka badan hal xafiis ama gobol.</p>				
Sharaxaada Xuquuqahaaga Dustuurka				
<p>Kadib marka lagu su'aalo, waxaa laguugula talin doonaa xuquuqahaaga, sidaan soo socota:</p> <p>1. Waxaad xaq u leedahay in aad aamusnaatid;</p> <p>2. Waxkasta oo aad dhahdid waxaa loo isticmaali karaa adiga lidkaaga sharciga maxkamada;</p> <p>3. Waxaad xaq u leedahay waqtigaan in aad lahaatid qareen adiga dooranaysid oona kula jooga/ama kula joogta kahor iyo inta lagu guda jiro su'aalaha marka lagu weydiinayo ama marka lasameynayo waxkasta oo warbixin ama hadal ah;</p> <p>4. Haddii aadan awoodin lacagta qareenka, waxaad xaq u leedahay in aad lahaatid mid adiga lagaaga magacaabo dhinaca maxkamada midkaas oo aan wax lacag ah kuugu fadhin oona kula jooga asaga/ayada kahor iyo inta lagu guda jiro su'aalaha marka lagu weydiinayo ama marka lasameynayo waxkasta oo warbixin ama hadal ah;</p> <p>5. Waxaad xaq u leedahay in aad isticmaashid midkasta oo kamid ah xuquuqaha kor kuqoran waqti kasta kahor iyo inta lagu guda jiraba marka su'aalaha lagu weydiinayo ama marka lasameynayo waxkasta oo warbixin ama hadal ah.</p>				
Digniinta Ganaaxa Barnaamijka Gargaarka Cuntada				
<p>Marka la eego xeerka WAC 388-446-0020, qofka lama siin doono gargaar ah gargaarka cuntada muddo ah: <u>Hal sano</u> marka uu si ula kac ah ugu xadgubbo xeerka gargaarka cuntada ama Barnaamijka Caawimada Nafaqada Kaabka ah (SNAP);</p> <p><u>Laba sannadood</u> ayaa loogu talagalay xadgudubka labaad; ama xukun dambi oo koobaad marka qofku iibsado, sii iibiyo ama waxtarrada gargaarka Cuntada ama Barnaamijka Caawimada Nafaqada Kaabka ah (SNAP) ku beddesho maandooriye mamnuuc ah;</p> <p><u>Toban sannadood</u> marka uu si ula kac ah u bixiyo macluumaad aqoonsi ama deggenaansho oo been ah si uu laba meelood uga qaato waxtarrada;</p> <p><u>Cimri ahaan</u> marka: Si ula kac ah mar saddexaad ugu xadgudba xeerka gargaarka cuntada ama Barnaamijka Caawimada Nafaqada Kaabka ah (SNAP); Xukun dambi oo labaad marka qofku iibsado, sii iibiyo, ama gargaarka cuntada ku beddesho maandooriye mamnuuc ah; Xukun dambi marku uu iibsado, sii iibiyo, ama gargaarka cuntada ku beddesho hub, rasaas, ama wax qarxa; ama Xukun dambi marka uu iibsado, sii iibiyo, uu beddesho gargaar cunto oo qiimihiisu dhan yahay \$500 ama ka badan.</p> <p>Dadka si ogaan iyo ula kac ah ugu xadgudba xeerka gargaarka cuntada waxa lagu qaadi karaa dambi waxana lagu ganaaxi karaa illaa \$250,000 ama xabsi ah labaatann sannadood ama labadaba. Waxa kale oo lagu qaadi karaa sharciyada kale ee federaalka ah ee ku habboon arrinta.</p>				
SAXEEXA QOFKA AAN LAHAYN U-BANAANAANTA	TAARIIKHDA	SAXIIXA MADAXA QOYSKA	TAARIIKHDA	
		(HADDII EEDAYSANHA UUSAN AHAYN MADAXA QOYSKA)		